# Habka falanqaynta saameynaha is-biirsaday ee hordhaca ah (la soo jeediyay)

Kani waa kii ugu horreeyay afar dukumenti oo bixiya dulmar guud oo heer sare ah oo ku saabsan tallaabooyinka ugu muhiimsan ee xeerka saameynaha is-biirsaday, sida ay u soo jeedisay Hay'adda Xakamaynta Wasakheynta Minnesota (MPCA) taariikhdu markay ahayd Maajo 18, 2026. MPCA waxay diyaarisay xeerkan si loogu soo bandhigo ogeysiis dadweyne, mana noqon doono mid kama dambeys ah ilaa laga soo gabagabeeyo habraaca maamul-dejinta xeerarka.

Dukumentigan kuma jiraan dhammaan qoraallada xeerka la soo jeediyay, waxaana loo diyaariyay si ay uga caawiso daneeyayaasha xiisaynaya inay si wanaagsan u fahmaan xeerka ay MPCA soo jeedisay. Nuqullo dhammaystiran oo qoraalka xeerka la soo jeediyay iyo Bayaanka Baahida iyo Macquulnimada (SONAR) waxaa laga heli karaa www.pca.state.mn.us/ci. Qoraalka xeerka ayaa ah waxa ay MPCA soo jeedinayso in la ansixiyo, halka SONAR uu yahay sababta sharciyeed ee ay hay'addu ku caddaynayso xeerkaas.

## Qiimeynta bilowga ah (waxaa dhammaystiray xarunta)

Xarunta waxay gudbisaa qiimeynta bilowga ah iyadoo la socota codsigeeda oggolaanshaha hawada. Qiimeynta bilowga ah waxay bixisaa go'aan muujinaya inay u arkaan inay u baahan yihiin iyo in kale inay sameeyaan falanqayn saameynaha is-biirsaday, iyadoo lagu salaynayo shuruudaha ku jira xeerka, oo ay ku jiraan sababaha iyo xogta loo adeegsaday go'aankaas. Qiimeynta bilowga ah waxaa loogu talagalay inay ka jawaabto su'aasha ah, "Tallaabada oggolaanshaha ee la codsaday ma leedahay awood ay si weyn ugu saameyso deegaanka ama caafimaadka dadka deggan aagga caddaaladda deegaanka?" waxaana arrintaas tixgelin doonta MPCA inta lagu jiro go'aaminta baahida.

Xarunta waxay bixisaa xog ay ka mid yihiin khariidad faahfaahinaysa deegaanka xaafadda, dhammaan oggolaanshaha looga baahan yahay xarunta, hawlgallada hadda jira iyo kuwa la soo jeediyay, natiijooyinka laga helay CI-MAP ee MPCA, taariikhda u hoggaansanaanta, isbeddellada lagu sameeyay xogtii loo adeegsaday falanqayntii hore ee saameynaha is-biirsaday, iyo go'aankooda ku saabsan baahida loo qabo falanqayn saameynaha is-biirsaday. MPCA waxay soo jeedisay xogta khasabka ah ee ay tahay in lagu daro qiimeynta bilowga ah si ay ugu suuragasho MPCA inay go'aamiso haddii xarun looga baahan yahay inay sameyso falanqayn saameynaha is-biirsaday.

MPCA waa inay ku bixisaa ogeysiis bogga internetka ee hay'adda kadib marka la helo qiimeynta bilowga ah.

**Saameynaha is-biirsaday** waxaa lagu qeexaa inay yihiin saameynaha ka dhasha heerarka isu-geynta wasakheynta hawada, biyaha, iyo dhulka ee hore iyo kuwa hadda jira gudaha aag cayiman oo dadka deggan ay la kulmaan.

**Madasha Khariidaynta iyo Falanqaynta Saameynaha Is-biirsaday (CI-MAP)** waxay isu keentaa arrimo badan oo culaysyo deegaan ah si ay uga caawiso muuqaal ahaan iyo fahamka culaysyada kala duwan ee deegaan ee ay la kulmaan dadka reer Minnesota, kuwaas oo keeni kara in dadka deggan aagga caddaaladda deegaanka (EJ) ay u nuglaadaan waxyeellada ka dhalata la kulanka wasakheynta.

### Yaa looga baahan doonaa inuu dhammaystiro qiimeyn bilow ah?

Guud ahaan, dhammaan xarumaha buuxiya nooca oggolaanshaha iyo ku habboonaanta juqraafiyeed ee hoos lagu tilmaamay waxaa looga baahan doonaa inay bixiyaan qiimeyn bilow ah sida uu dhigayo sharciga.

MINNESOTA POLLUTION CONTROL AGENCY

**Xarunta waa inay ku taallaa:**

- toddobada degmo ee deegaanka Twin Cities metro iyo magaalooyinka heerka koowaad ee hadda jira ee Duluth iyo Rochester (aagga saameynaha is-biirsaday sida uu sharcigu qeexayo), iyo
- aag caddaaladda deegaanka ah ama meel u jirta hal mayl gudaha aag caddaaladda deegaanka ah

**Xarunta waa inay haysataa, ama codsanaysaa:**

- oggolaansho gaar ah oo qaybta 70 ah
- oggolaansho gaar ah oo hawada gobolka ah oo ay ku jiraan xaddidaado lagu ilaalinayo qiiqa inuu ka hooseeyo heerarka uu oggol yahay oggolaanshaha qaybta 70, am
- oggolaansho gaar ah oo hawada gobolka ah oo loogu talagalay gube qashin

**Xarunta waxay codsanaysaa oggolaansho hawada ah oo loogu talagalay:**

- dhismaha xarun cusub
- ballaarinta xarun jirta iyada oo loo marayo wax-ka-beddel dhexdhexaad ah ama weyn oo awood u leh inuu kordhiyo qiiqa, ama
- dib-u-soo-saarista oggolaansho hawada ah oo dhacaya oo loogu talagalay xarun jirta

## Yaa aan looga baahnayn inuu dhammaystiro qiimeyn bilow ah?

Qaar ka mid ah xarumaha buuxiya shuruudaha juqraafiyeed iyo nooca oggolaanshaha loogama baahnaan doono inay diyaariyaan qiimeyn bilow ah, sida kuwa codsanaya:

- wax-ka-beddello maamul
- wax-ka-beddello yaryar, ama
- wax-ka-beddello oggolaansho oo aan ku lug lahayn wax ka beddelid

### Xaggee laga heli karaa xogtan gudaha qoraalka xeerka la soo jeediyay iyo SONAR?

Qaybta 7007.6050 Qiimeynta Bilowga ah

Dukumentigan wuxuu bixinayaa dulmar guud oo ku saabsan Xeerka Saameynaha Is-biirsaday, sida ay MPCA u soo jeedisay Maajo 18, 2026. Nuqullo dhammaystiran oo qoraalka xeerka la soo jeediyay iyo Bayaanka Baahida iyo Macquulnimada (SONAR) waxaa laga heli karaa www.pca.state.mn.us/ci. Xeerku ma noqon doono mid kama dambeys ah ilaa laga soo gabagabeeyo habraaca maamul-dejinta xeerarka.

Oggolaanshaha gaarka ah ee **qaybta 70 waa oggolaansho hawlgal** oo loogu talagalay xarumaha ugu waaweyn, kuwaas oo ah ilo waaweyn oo qiiqa hawada ah, waxaana lagu saleeyaa shuruudaha federaalka. Oggolaanshahan waxaa si gaar ah loogu qoraa hawlaha xaruntaas wuxuuna dhacayaa muddo cayiman kadib, markaasna waa in dib loo soo saaraa.

**Oggolaanshaha gaarka ah ee gobolka** waa oggolaansho hawlgal oo loogu talagalay ilo yaryar oo qiiqa hawada ah, waxaana si gaar ah loogu qoraa hawlaha xaruntaas, badanaana ma laha waqti dhacitaan.

Gube qashin waa **xarun lagu gubo qashin**, haraaga, iyo qashin adag oo kale, taas oo soo saarta qiiq.

**Wax-ka-beddellada dhexdhexaadka ah iyo kuwa waaweyn ee oggolaanshaha** hawada waxaa qayb ahaan lagu go'aamiyaa cabbirka kororka qiiqa ee la soo jeediyay. Wax ka beddelidda xaddidaadaha jira ee kormeerka ama qiiqa ee u gaarka ah xarun ayaa sidoo kale u baahan doonta wax-ka-beddel weyn oo lagu sameeyo oggolaanshaha hawada.

**Wax-ka-beddel maamul** waa isbeddel lagu sameeyo oggolaansho aan ku lug lahayn wax ka beddelid lagu sameeyo xarunta, sida isbeddel lahaansho ama habka diiwaan haynta.

**Wax-ka-beddel yar** waa wax ka beddelid aan sababi doonin koror ku yimaada qiiqa wax kasta oo wasakheeye hawada la nidaamiyo oo ka sarreeya heer cayiman.

**Wax ka beddelid** waa isbeddel jireed kasta ama isbeddel lagu sameeyo habka hawlgalka oo keeni kara koror ku yimaada qiiqa wasakheeye hawada la nidaamiyo.

## Codsi cabasho (waxaa dhammaystiray dadka deggan aagga caddaaladda deegaanka ee ay saameyntu gaartay)

Marka xarun ay gudbiso qiimeyn bilow ah iyo codsi oggolaansho hawada ah, dadka deggan iyo milkiilayaasha hantida ee ku nool aagga caddaaladda deegaanka ee ay saameyntu gaartay waxay gudbin karaan codsi cabasho oo ay ku dalbanayaan in MPCA go'aamiso in xarunta looga baahan yahay inay sameyso falanqayn saameynaha is-biirsaday. Codsi cabasho waa la gudbin karaa ilaa uu dhammaanayo muddada ogeysiiska dadweynaha iyo faallooyinka ee qabyo-qoraalka oggolaanshaha hawada.

Habka codsi cabashada wuxuu u baahan yahay ugu yaraan 100 saxiix iyo cinwaanno boosto oo ka yimid shaqsiyaad deggan ama hanti ku leh aagga caddaaladda deegaanka ee ay saameyntu gaartay, waana inuu ku jiraa caddeymo muhiim ah. Caddeymaha muhiimka ah waa inay muujiyaan in tallaabada oggolaanshaha ee la codsaday ay leedahay awood ay si weyn ugu saameyso deegaanka ama caafimaadka dadka deggan aagga caddaaladda deegaanka.

MPCA waxay dib u eegtaa codsi cabashada si ay u xaqiijiso in xogta loo baahan yahay lagu daray. Haddii xogta loo baahan yahay aan lagu darin, MPCA waxay u sheegi doontaa qofka gudbiyay codsiga khaladaadka uu sameeyay waxayna u sheegi doontaa sida iyo waqtiga lagu saxayo khaladaadkaas. Codsi cabashada waa in la saxo oo dib loo gudbiyaa 15 maalmood gudahood ama waxaa loo tixgelin doonaa mid aan ansax ahayn. MPCA waa inay ogeysiis ku bixisaa bogga internetka ee hay'adda kadib marka codsi cabasho ay hay'addu aqbasho.

**Aagga caddaaladda deegaanka ee ay saameyntu** gaartay waa hal ama in ka badan oo aagagga caddaaladda deegaanka ah oo ku yaalla gudaha hal mayl oo ka baxsan xadka hantida xarunta, xitaa haddii qayb keliya oo ka mid ah aaggaas caddaaladda deegaanka ay ku jirto masaafadaas hal mayl ah.

**Caddeymo muhiim** ah laguma qeexin xeerka, balse guud ahaan waxay ka dhigan yihiin inay jirto xiriir u dhexeeya waxa loo soo bandhigay caddeyn ahaan iyo saameynta la sharaxay (tusaale ahaan, joornaallo cilmiyeed, waraaqo markhaati ah, maqaal wargeysyo, sawirro, iyo wixii la mid ah).

MPCA waa inay tixgelisaa codsi cabashada iyo caddeymaha muhiimka ah iyada oo qayb ka ah go'aaminta baahida, iyadoo adeegsanaysa isla halbeegyada la soo jeediyay ee dib loogu eegayo qiimeynta bilowga ah ee ay gudbisay xarunta.

**Xaggee laga heli karaa xogtan gudaha qoraalka xeerka la soo jeediyay iyo SONAR?**

Qaybta 7007.6060 Habka Codsi Cabashada

## Go'aaminta baahida (waxaa dhammaystiray MPCA)

MPCA waxay go'aamisaa haddii xarunta looga baahan yahay inay sameyso falanqayn saameynaha is-biirsaday iyadoo dib u eegaysa xogta ay xaruntu ku bixisay qiimeynta bilowga ah iyo codsiga oggolaanshaha. MPCA waxay go'aamisaa haddii "tallaabada oggolaanshaha ee la codsaday ay si weyn u saameyn karto deegaanka ama caafimaadka dadka deggan aagga caddaaladda deegaanka" iyadoo isbarbardhigaysa saameynaha suurtagalka ah iyo halbeegyada lagu soo jeediyay xeerarka, isla markaana dib u eegaysa xog kasta oo kale oo loo arko inay khuseyso. Haddii codsi cabasho la gudbiyo, MPCA sidoo kale way tixgelisaa marka ay go'aaminayso baahida loo qabo falanqayn saameynaha is-biirsaday.

Haddii MPCA go'aamiso in falanqayn saameynaha is-biirsaday loo baahan yahay, xarunta waa inay sii waddaa habka saameynaha is-biirsaday, kaas oo ay ku jiraan qabashada ugu yaraan laba kulan dadweyne iyo sameynta falanqayn saameynaha is-biirsaday.

Haddii MPCA go'aamiso in falanqayn saameynaha is-biirsaday aan loo baahnayn, xaruntu waxay ka baxaysaa habka saameynaha is-biirsaday waxayna sii wadaysaa habka oggolaanshaha hawada.

MPCA waa inay diyaarisaa oo ay ku wadaagtaa bogga internetka ee hay'adda dukumenti qoraal ah oo wata go'aankeeda ku saabsan baahida loo qabo falanqayn saameynaha is-biirsaday, kaas oo sharxaya sida go'aanka loo gaaray.

## Sidee ayay MPCA u samayn doontaa go'aamintan?

### 1. Falanqayn saameynaha is-biirsaday oo khasab ah

MPCA waa inay ku khasabtaa falanqayn saameynaha is-biirsaday marka saameynaha suurtagalka ah ee ka dhalanaya bixinta oggolaanshaha ay ka gudbaan halbeeg kasta oo lagu dejiyay xeerka oo loogu talagalay sameynta falanqayn saameynaha is-biirsaday. Tusaale ahaan, MPCA waa inay ku khasabtaa falanqayn saameynaha is-biirsaday xaaladaha soo socda:

- xarun cusub
- ballaarinta xarun jirta oo keeni karta koror qiiqa ka badan heer cayiman, iyo
- dib-u-soo-saarista oggolaansho loogu talagalay xarun jirta oo leh taariikh tallaabooyin fulin sharci ah saddexdii sano ee la soo dhaafay

MPCA waa inay ku khasabtaa falanqayn saameynaha is-biirsaday marka bixinta oggolaanshuhu ay si weyn u saameyn karto deegaanka ama caafimaadka dadka deggan aagga caddaaladda deegaanka.

### 2. Discretionary cumulative impacts analysis

MPCA waxay dalban kartaa falanqayn saameynaha is-biirsaday marka caddeymo muhiim ah, oo ay ururisay MPCA ama lagu helay codsi cabasho, ay muujiyaan saameyn is-biirsaday oo taban oo suurtagal ah. Xaaladdan, MPCA waxay dalban kartaa falanqayn saameynaha is-biirsaday iyada oo aan la buuxin shuruudaha ku jira xeerka ee falanqaynta saameynaha is-biirsaday ee khasabka ah.

Xarunta ayaa sidoo kale codsan karta inay si ikhtiyaari ah u sameyso falanqayn CI ah.

## Waa maxay shuruudaha ay MPCA tixgelin doonto marka ay samaynayso go'aamintan?

MPCA waxay tixgelin doontaa xogta soo socota marka ay go'aaminayso baahida loo qabo in xarun ay dhammaystirto falanqayn saameynaha is-biirsaday:

- nooca iyo baaxadda saameynta, iyo haddii dib looga noqon karo
- saameynta is-biirsaday ee suurtagalka ah, oo ay ku jirto muhiimadda saameyntaasi iyo qaybta ay xaruntu ka qaadanayso marka loo barbar dhigo qaybta ay ka qaataan ilo kale oo wasakheyn ah
- dadaallada ay xaruntu sameysay si loo joojiyo ama loo yareeyo wasakheynta ka timaadda xarunta
- inta ay saameynaha suurtagalka ahi u yaraanayaan sharciyo kale ama hay'ado/tallaabooyin nidaamiye ah
- inta ay suurtagal u tahay in saameynaha suurtagalka ah la saadaaliyo lana xakameeyod

### Xaggee laga heli karaa xogtan gudaha qoraalka xeerka la soo jeediyay iyo SONAR?

Qaybta 7007.6070 Go'aaminta Baahida

Dukumentigan wuxuu bixinayaa dulmar guud oo ku saabsan Xeerka Saameynaha Is-biirsaday, sida ay MPCA u soo jeedisay Maajo 18, 2026. Nuqullo dhammaystiran oo qoraalka xeerka la soo jeediyay iyo Bayaanka Baahida iyo Macquulnimada (SONAR) waxaa laga heli karaa www.pca.state.mn.us/ci. Xeerku ma noqon doono mid kama dambeys ah ilaa laga soo gabagabeeyo habraaca maamul-dejinta xeerarka.

MINNESOTA POLLUTION CONTROL AGENCY

## Qorshaha ka qaybgalka dadweynaha ee falanqaynta saameynaha is-biirsaday (waxaa dhammaystiray xarunta)

Haddii MPCA go'aamiso in xarun looga baahan yahay inay sameyso falanqayn saameynaha is-biirsaday, xaruntu waa inay gudbisaa qorshe ka qaybgal dadweyne 30 maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda ay MPCA ku wadaagto go'aaminta baahida bogga internetka ee hay'adda. Qorshahan waa inuu muujiyaa sida ay xaruntu u buuxin doonto shuruudaha ka qaybgalka dadweynaha ee ku jira xeerka, iyo sidoo kale jadwalka qabashada kulamada dadweynaha, ogeysiisyada dadweynaha, iyo muddooyinka faallooyinka dadweynaha.

MPCA waxay dib u eegtaa qorshaha si ay u xaqiijiso in xogta loo baahan yahay lagu daray ka hor inta aysan xaruntu bixin ogeysiiska dadweynaha ee kulanka ugu horreeya ee dadweynaha ee looga baahan yahay inay qabato. Haddii qorshaha aan la ansixin karin, MPCA waxay u sheegi doontaa xarunta khaladaadka ay sameeyeen waxayna u sheegi doontaa sida iyo waqtiga lagu saxayo khaladaadkaas. Xaruntu ma sii wadi karto bixinta ogeysiiska dadweynaha ee kulanka dadweynaha ee loo baahan yahay iyo sameynta falanqaynteeda saameynaha is-biirsaday ilaa qorshahan ay MPCA ansixiso.

**Xaggee laga heli karaa xogtan gudaha qoraalka xeerka la soo jeediyay iyo SONAR?**

Qaybta 7007.6080 Ka Qaybgalka Dadweynaha

## Kulanka ugu horreeya ee dadweynaha iyo muddada faallooyinka ee falanqaynta saameynaha is-biirsadayd

Qoraalka sharcigu wuxuu uga baahan yahay xarunta inay qabato kulamo dadweyne gudaha aagga caddaaladda deegaanka ee ay saameyntu gaartay haddii looga baahan yahay inay sameyso falanqayn saameynaha is-biirsaday. Ugu yaraan hal kulan waa in la qabtaa ka hor sameynta falanqaynta, mid kalena waa in la qabtaa kadib.

MPCA waxay soo jeedisay goobaha iyo waqtiyada kulamada la qaban karo, xogta khasabka ah ee la wadaagayo, iyo goorta iyo sida xogta loo baahan yahay loo wadaagayo. Dulmar guud oo ku saabsan shuruudaha la soo jeediyay ee dhammaan ogeysiisyada dadweynaha, kulamada dadweynaha, iyo muddooyinka faallooyinka dadweynaha inta lagu jiro habka saameynaha is-biirsaday waxaa laga heli karaa Shuruudaha Ka Qaybgalka Dadweynaha (La Soo Jeediyay).

Xarunta waxaa sidoo kale looga baahan yahay inay bixiso xog ku saabsan qiimeynta bilowga ah, sababta falanqayn saameynaha is-biirsaday loogu baahan yahay, iyo xogta ay tahay inay ku darto falanqaynta saameynaha is-biirsaday inta lagu jiro kulanka ugu horreeya ee dadweynaha ee falanqaynta saameynaha is-biirsaday.

**Xaggee laga heli karaa xogtan gudaha qoraalka xeerka la soo jeediyay iyo SONAR?**

Qaybta 7007.6080 Ka Qaybgalka Dadweynaha

Dukumentigan wuxuu bixinayaa dulmar guud oo ku saabsan Xeerka Saameynaha Is-biirsaday, sida ay MPCA u soo jeedisay Maajo 18, 2026. Nuqullo dhammaystiran oo qoraalka xeerka la soo jeediyay iyo Bayaanka Baahida iyo Macquulnimada (SONAR) waxaa laga heli karaa www.pca.state.mn.us/ci. Xeerku ma noqon doono mid kama dambeys ah ilaa laga soo gabagabeeyo habraaca maamuldejinta xeerarka.

MINNESOTA POLLUTION CONTROL AGENCY

# Habka falanqaynta saameynta is-biirsaday (la soo jeediyay)

Kani waa kii labaad afarta dukumenti ee bixiya dulmar guud oo heer sare ah oo ku saabsan tallaabooyinka ugu muhiimsan ee xeerka saameynaha is-biirsaday, sida ay soo jeedisay Hay'adda Xakamaynta Wasakheynta Minnesota (MPCA) May 18, 2026. MPCA waxay diyaarisay xeerkan si loogu soo bandhigo ogeysiis dadweyne, mana noqon doono mid kama dambeys ah ilaa laga soo gabagabeeyo habraaca maamul-dejinta xeerarka.

Dukumentigan kuma jiraan dhammaan qoraallada xeerka la soo jeediyay, waxaana loo diyaariyay si ay uga caawiso daneeyayaasha xiisaynaya inay si wanaagsan u fahmaan xeerka ay MPCA soo jeedisay. Nuqullo dhammaystiran oo qoraalka xeerka la soo jeediyay iyo Bayaanka Baahida iyo Macquulnimada (SONAR) waxaa laga heli karaa www.pca.state.mn.us/ci. Qoraalka xeerka ayaa ah waxa ay MPCA soo jeedinayso in la ansixiyo, halka SONAR uu yahay sababta sharciyeed ee ay hay'addu ku caddaynayso xeerkaas.

## Falanqaynta saameynta is-biirsaday (waxaa dhammaystira xarunta)

Xarunta waxay samaysaa falanqayn saameynata is-biirsaday iyadoo ku daraysa macluumaad dheeraad ah qiimeynteeda bilowga ah. MPCA waxay xeerka ku soo jeedisay macluumaadka dheeraadka ah ee ay tahay in lagu daro falanqaynta saameynaha is-biirsaday. Tani waxay sidoo kale ka kooban tahay dib-u-eegis kasta oo lagu sameeyo macluumaadkii lagu daray qiimeynta bilowga ah iyadoo lagu salaynayo faallooyinka la bixiyay intii lagu jiray kulanka ugu horreeya ee dadweynaha iyo muddada faallooyinka dadweynaha. Falanqaynta saameynaha is-biirsaday waxaa loogu talagalay inay ka jawaabto su'aasha ah, "Tallaabada oggolaanshaha ee la codsaday ma yeelan doontaa saameyn taban oo weyn oo ku saabsan deegaanka ama caafimaadka dadka deggan aagga caddaaladda deegaanka?" Xarunta waa inay bixisaa jawaabteeda su'aashan iyo sababaha ay ku salaysay jawaabtaas.

MPCA waxay soo jeedisay macluumaadka khasabka ah ee ay tahay in lagu daro falanqaynta saameynaha is-biirsaday. Macluumaadkan wuxuu ku salaysan yahay waxa loo baahan yahay si loo qiimeeyo saameynaha caafimaadka iyo deegaanka ee ka dhalan kara hawlgallada hadda jira iyo kuwa la soo jeediyay ee xarunta, waxaana ka mid ah:

- khariidadda goobta xarunta
- wasakhow kasta oo ka jira goobta xarunta
- saameynaha cimilada ee deegaanka ku kooban
- daraasad ku saabsan gaadiidka la xiriira xarunta
- maareynta biyaha roobka
- saameynaha urta, boodhka, iyo qaylada
- xaddidaadaha, kontaroollada, ama tallaabooyinka kale ee loo isticmaalo ka hortagga ama yaraynta saameynaha
- talooyinka iyo aragtiyada dadweynaha, iyo tallaabooyinka laga qaaday jawaab ahaan
- saameynta dhaqan-dhaqaale ee xarunta iyo tallaabada oggolaanshaha ee la soo jeediyay
- falanqaynta moodeellaynta tayada hawada
- falanqaynta khatarta qiiqa hawada (AERA)
- macluumaad kasta oo kale oo khuseeya

**Falanqaynta moodeellaynta tayada hawada** waa hab adeegsada moodeel kombiyuutar si loo qiyaaso heerarka wasakhowga hawada ee ka imanaya xarumaha la nidaamiyo iyo ilo kale oo wasakhow. Natiijooyinka waxaa lala barbardhigaa Heerarka Qaranka ee Tayada Hawada Deegaanka (National Ambient Air Quality Standards, NAAQS) iyo Heerarka Minnesota ee Tayada Hawada Deegaanka (Minnesota Ambient Air Quality Standards, MAAQS).

**Falanqaynta khatarta qiiqa hawada** waa hab adeegsada xaashiyaha xisaabinta (spreadsheets), moodeellada kombiyuutarka, iyo halbeegyo qiimeyn si loo baaro khataraha caafimaad ee suurtagalka ah, loona qiyaaso khataraha caafimaadka dadka ee ka dhalan kara wasakhowga hawada ee ay sii deyso xarunta.

MINNESOTA POLLUTION CONTROL AGENCY

### Xaggee laga heli karaa xogtan gudaha qoraalka xeerka la soo jeediyay iyo SONAR?

Qaybta 7007.6090 Falanqaynta Saameynaha Is-biirsaday

## Kulanka labaad ee dadweynaha ee falanqaynta saameynaha is-biirsaday iyo muddada faallooyinka dadweynaha

Qoraalka sharciga wuxuu uga baahan yahay xarunta inay qabato laba kulan dadweyne gudaha aagga caddaaladda deegaanka ee ay saameyntu gaartay haddii looga baahan yahay inay samayso falanqayn saameynaha is-biirsaday. Ugu yaraan hal kulan waa in la qabtaa ka hor samaynta falanqaynta saameynaha is-biirsaday, halka kulankan labaad ee dadweynaha ee falanqaynta saameynaha is-biirsaday la qabanayo kadib.

MPCA waxay soo jeedisay goobaha iyo waqtiyada kulamada la qaban karo, macluumaadka ay tahay inay xarunta wadaagto, iyo goorta iyo sida macluumaadkaas loo baahan yahay loo wadaagayo. Dulmar guud oo ku saabsan shuruudaha la soo jeediyay ee dhammaan ogeysiisyada dadweynaha, kulamada dadweynaha, iyo muddooyinka faallooyinka dadweynaha inta lagu jiro habka saameynaha is-biirsaday waxaa laga heli karaa Shuruudaha Ka Qaybgalka Dadweynaha (La Soo Jeediyay).

Xarunta waxaa sidoo kale looga baahan yahay inay bixiso:

- soo koobidda faallooyinka la helay intii lagu jiray kulankii ugu horreeyay ee dadweynaha iyo muddadii faallooyinka dadweynaha, iyo sida ay faallooyinkaas u saameeyeen falanqaynta saameynaha is-biirsaday
- macluumaadka lagu daray falanqaynta saameynaha is-biirsaday
- go’aaminta ay xarunta samaysay ee ku saabsan in tallaabada oggolaanshaha ee la codsaday ay keeni doonto iyo in kale saameyn taban oo weyn

### Xaggee laga heli karaa xogtan gudaha qoraalka xeerka la soo jeediyay iyo SONAR?

Qaybta 7007.6080 Ka Qaybgalka Dadweynaha

## Go’aaminta saameynaha taban ee waaweyn (waxaa dhammaystiray MPCA)

MPCA waxay go’aamisaa haddii xarunta iyo tallaabada oggolaanshaha ee la codsaday ay yeelan doonaan saameyn taban oo weyn oo ku saabsan deegaanka ama caafimaadka dadka deggan aagga caddaaladda deegaanka.

Haddii MPCA go’aamiso in tallaabada oggolaanshaha ee la codsaday ay yeelan doonto saameyn taban oo weyn, xarunta waa inay sii waddaa habka saameynaha is-biirsaday, kaas oo ay ku jiraan qabashada ugu yaraan laba kulan dadweyne iyo gelitaanka heshiis faa’iido bulsho oo lala galo MPCA.

Dukumentigan wuxuu bixinayaa dulmar guud oo ku saabsan Xeerka Saameynaha Is-biirsaday, sida ay MPCA u soo jeedisay May 18, 2026. Nuqullo dhammaystiran oo qoraalka xeerka la soo jeediyay iyo Bayaanka Baahida iyo Macquulnimada (SONAR) waxaa laga heli karaa www.pca.state.mn.us/ci. Xeerku ma noqon doono mid kama dambeys ah ilaa laga soo gabagabeeyo habraaca maamul-dejinta xeerarka.

Haddii xarunta iyo tallaabada oggolaanshaha ee la codsaday ay yeelan **doonaan** saameyn taban oo weyn, xarunta waxay soo jeedin kartaa kontaroollo, xaddidaadyo, ama tallaabooyin kale oo looga hortagayo saameynta taban ee weyn. Haddii MPCA go'aamiso in tallaabooyinkaas ay ka hortagi doonaan saameynta taban ee weyn, xarunta waxay wax ka beddeli doontaa tallaabada oggolaanshaha ee la codsaday iyo falanqaynta saameynaha is-biirsaday. Xarunta waxay markaas dhammaystirtay habka saameynaha is-biirsaday waxayna sii wadaysaa habka oggolaanshaha hawada.

Haddii MPCA go'aamiso in tallaabada oggolaanshaha ee la codsaday **aysan yeelan doonin** saameyn taban oo weyn, xarunta waxay dhammaystirtay habka saameynaha is-biirsaday waxayna sii wadaysaa habka oggolaanshaha hawada.

MPCA waa inay diyaarisaa oo ay ku wadaagtaa bogga internetka ee hay'adda dukumenti qoraal ah oo ka kooban go'aaminteeda ku saabsan saameynaha taban ee waaweyn iyo sharaxaad ku saabsan sida go'aankaas loo gaaray.

### Waa maxay macluumaadka ay MPCA tixgelin doonto marka ay samaynayso go'aamintan?

Qoraalka sharcigu wuxuu uga baahan yahay MPCA inay tixgeliso waxyaabaha soo socda:

1. Saameynaha deegaanka iyo caafimaadka ee ku dhaca dadka deggan aagga caddaaladda deegaanka, sida lagu daray falanqaynta saameynaha is-biirsaday
2. Saameynaha iyo nuglaanshaha hore uga jiray aagga caddaaladda deegaanka, oo ay ku jiraan culeysyada deegaanka iyo sida ay u kordhin karaan saameynaha taban ee ka imanaya xarunta
3. Talooyinka iyo aragtiyada bulshada, oo ay ku jiraan faallooyinka afka ah iyo kuwa qoran, iyo caddeymaha la soo bandhigay
4. Saameynta dhaqan-dhaqaale ee xarunta ku leedahay dadka deggan aagga caddaaladda deegaanka
5. Macluumaad kasta oo kale oo MPCA ay go'aansato inuu khuseeyo go'aaminta in tallaabada oggolaanshaha ee la codsaday ay yeelan doonto saameyn taban oo weyn oo ku saabsan deegaanka ama caafimaadka dadka deggan aagga caddaaladda deegaanka

### Sidee ayay MPCA u samayn doontaa go'aamintan?

Go'aamintan waxay ku salaysan tahay qiimayn tayo leh (oo ku salaysan sharaxaad) iyo qiimayn tiro ahaan ah (oo ku salaysan tirooyin iyo xog).

### Qiimaynta tiro ahaan ah

Marka uu jiro halbeeg ama xad la dejiyay, MPCA waxay go'aamin doontaa haddii ay jirto saameyn taban oo weyn iyadoo ku salaynaysa xadkaas tiro ahaan loo dejiyay. Qiimaynnada tiro ahaan ah ee lagu go'aamiyo saameynaha taban ee waaweyn waxaa ka mid ah falanqaynta khatarta qiiqa hawada (AERA) iyo falanqaynta moodeellaynta tayada hawada, kuwaas oo leh xadad lagu dejiyay heerarka gobolka iyo kuwa federaalka. Tusaale ahaan, AERA waxay soo saartaa qiyaaso ku saabsan khatarahaa caafimaadka dadka ee ka dhalan kara wasakhowga hawada, kuwaas oo lala barbardhigo tilmaamaha khatarta xarumaha ee ay MPCA la samaysay Waaxda Caafimaadka Minnesota.

Dukumentigan wuxuu bixinayaa dulmar guud oo ku saabsan Xeerka Saameynaha Is-biirsaday, sida ay MPCA u soo jeedisay May 18, 2026. Nuqullo dhammaystiran oo qoraalka xeerka la soo jeediyay iyo Bayaanka Baahida iyo Macquulnimada (SONAR) waxaa laga heli karaa www.pca.state.mn.us/ci. Xeerku ma noqon doono mid kama dambeys ah ilaa laga soo gabagabeeyo habraaca maamul-dejinta xeerarka.

## Qiimaynta tayo leh

Marka aanu jirin xad ama halbeeg la dejiyay oo lagu qiimeeyo arrin gaar ah, MPCA waxay tixgelin doontaa sharaxaadaha qoran ee saameynaha, kuwaas oo eegaya saamiga ay xarunta ku leedahay saameynta iyo culeysyada deegaanka ee ka jira aagga caddaaladda deegaanka. Tusaale ahaan, xarunta waxay bixin kartaa sharaxaad ku saabsan koror joogto ah oo ku yimaada gaadiidka xamuulka qaada ee gala ama ka baxa xarunta sababta oo ah tallaabada oggolaanshaha ee la codsaday.

MPCA waxay tixgelin doontaa macluumaadka loo baahan yahay iyadoo adeegsanaysa shuruudahan soo socda ee qiimaynta tayo leh:

- nooca iyo baaxadda saameynta, iyo in saameyntaasi tahay mid dib looga noqon karo iyo in kale
- saameynaha is-biirsaday, oo ay ku jiraan heerka muhiimadda saameyntaasi leedahay iyo saamiga ay xarunta ku leedahay marka loo barbardhigo saamiga ka imanaya ilo kale oo wasakhow
- dadaallada ay xarunta samaysay si loo joojiyo ama loo yareeyo wasakhowga ka imanaya xarunta
- heerka ay saameynaha suurtagalka ahi u yaraanayaan sababo la xiriira sharciyo kale ama tallaabooyin ay qaadeen hay'adaha sharci-dejinta iyo nidaaminta
- heerka ay saameynaha suurtagalka ahi yihiin kuwo la sii saadaalin karo lana xakameyn karo
- culeysyada deegaanka ee ka jira aagga caddaaladda deegaanka ee ay saameyntu gaartay iyo sida ay u sii xoojin karaan saameynaha taban ee deegaanka ama caafimaadka

**Xaggee laga heli karaa xogtan gudaha qoraalka xeerka la soo jeediyay iyo SONAR?**

Qaybta 7007.6100 Saameynta Taban ee Weyn (Substantial Adverse Impact)

Dukumentigan wuxuu bixinayaa dulmar guud oo ku saabsan Xeerka Saameynaha Is-biirsaday, sida ay MPCA u soo jeedisay May 18, 2026. Nuqullo dhammaystiran oo qoraalka xeerka la soo jeediyay iyo Bayaanka Baahida iyo Macquulnimada (SONAR) waxaa laga heli karaa www.pca.state.mn.us/ci. Xeerku ma noqon doono mid kama dambeys ah ilaa laga soo gabagabeeyo habraaca maamul-dejinta xeerarka.

MINNESOTA POLLUTION CONTROL AGENCY

# Habka falanqaynta saameyta is-biirsaday kadib iyo habka heshiiska faa'iidada bulshada (la soo jeediyay)

Kani waa kii saddexaad afarta dukumenti ee bixiya dulmar guud oo heer sare ah oo ku saabsan tallaabooyinka ugu muhiimsan ee xeerka saameynta is-biirsaday, sida ay soo jeedisay Hay'adda Xakamaynta Wasakheynta Minnesota (MPCA) taariikhdu markay ahayd May 18, 2026. MPCA waxay diyaarisay xeerkan si loogu soo bandhigo ogeysiis dadweyne, mana noqon doono mid kama dambeys ah ilaa laga soo gabagabeeyo habraaca maamul-dejinta xeerarka.

Dukumentigan kuma jiraan dhammaan qoraallada xeerka la soo jeediyay, waxaana loo diyaariyay si ay uga caawiso daneeyayaasha xiisaynaya inay si wanaagsan u fahmaan xeerka ay MPCA soo jeedisay. Nuqullo dhammaystiran oo qoraalka xeerka la soo jeediyay iyo Bayaanka Baahida iyo Macquulnimada (SONAR) waxaa laga heli karaa www.pca.state.mn.us/ci. Qoraalka xeerka ayaa ah waxa ay MPCA soo jeedinayso in la ansixiyo, halka SONAR uu yahay sababta sharciyeed ee ay hay'adda ku caddaynayso xeerkaas.

## Qorshaha ka qaybgalka dadweynaha ee heshiiska faa'iidada bulshada (waxaa dhammaystiray xarunta)

Haddii MPCA go'aamiso inay jirto saameyn taban oo weyn, xarunta waxaa laga doonayaa inay la gasho MPCA heshiis faa'iido bulsho (Community Benefit Agreement, CBA). Ka hor inta aysan fulin hawlaha ka-qaybgalka ee loo baahan yahay, xarunta waa inay gudbisaa qorshe ka qaybgal dadweyne 30 maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda ay MPCA ku baahiso go'aaminta saameynta taban ee weyn bogga internetka ee hay'adda. Qorshahan waa inuu muujiyo sida ay xaruntu u buuxin doonto shuruudaha xeerka ee ka qaybgalka dadweynaha iyo wacyigelinta bulshada, iyo sidoo kale jadwalka qabashada kulamada dadweynaha, bixinta ogeysiisyada dadweynaha, iyo muddada faallooyinka dadweynaha.

**Heshiiska faa'iidada bulshada** waa heshiis sharci ahaan la dhaqan gelin karo oo u dhexeeya MPCA iyo xarun, kaas oo qeexaya faa'iidooyinka ay xaruntu oggolaatay inay siiso dadka deggan aagga caddaaladda deegaanka ee ay saameyntu gaartay.

MPCA waxay soo jeedisay in xarunta sidoo kale looga baahan yahay inay boosto ahaan ugu dirto agab macluumaad oo daabacan dhammaan cinwaannada ku yaalla aagga caddaaladda deegaanka ee ay saameyntu gaartay, waxayna xeerka ku faahfaahisay macluumaadka ay tahay in lagu daro boostadaas. Xaruntu waa inay ku muujisaa qorshaha ka qaybgalka dadweynaha sida ay u qorshaynayso inay u buuxiso shuruuddan.

MPCA waxay dib u eegtaa qorshaha si ay u xaqiijiso in xogta loo baahan yahay lagu daray ka hor inta aysan xaruntu bixin ogeysiiska dadweynaha ee kulanka ugu horreeya ee dadweynaha ee looga baahan yahay inay ka qabato heshiiska faa'iidada bulshada. Haddii qorshaha aan la ansixin karin, MPCA waxay u sheegi doontaa xarunta khaladaadka ay sameeyeen waxayna u sheegi doontaa sida iyo waqtiga lagu saxayo khaladaadkaas Xaruntu ma sii wadi karto bixinta ogeysiiska dadweynaha ee kulanka dadweynaha ee loo baahan yahay iyo diyaarinta heshiiska faa'iidada bulshada ilaa qorshahan ay MPCA ansixiso.

### Xaggee laga heli karaa xogtan gudaha qoraalka xeerka la soo jeediyay iyo SONAR?

Qaybta 7007.6080 Ka Qaybgalka Dadweynaha
Qaybta 7007.6110 Heshiisyada Faa'iidada Bulshada (Community Benefit Agreements)

MINNESOTA POLLUTION CONTROL AGENCY

## Kulanka ugu horreeya ee dadweynaha ee heshiiska faa'iidada bulshada iyo muddada faallooyinka dadweynaha.

Qoraalka sharcigu wuxuu uga baahan yahay xarunta inay qabato ugu yaraan hal kulan dadweyne gudaha aagga caddaaladda deegaanka ee ay saameyntu gaartay haddii looga baahan yahay inay gasho heshiis faa'iido bulsho. MPCA waxay xeerka ku soo jeedisay in xaruntu qabato hal kulan ka hor diyaarinta heshiiska faa'iidada bulshada, halka kulan kale la qabanayo kadib.

MPCA waxay soo jeedisay goobaha iyo waqtiyada kulamada la qaban karo, macluumaadka ay tahay in la wadaago, iyo goorta iyo sida macluumaadka loo baahan yahay loo wadaagayo. Dulmar guud oo ku saabsan shuruudaha la soo jeediyay ee dhammaan ogeysiisyada dadweynaha, kulamada dadweynaha, iyo muddooyinka faallooyinka dadweynaha inta lagu jiro habka saameynaha is-biirsaday waxaa laga heli karaa Shuruudaha Ka Qaybgalka Dadweynaha (La Soo Jeediyay).

Xarunta waxaa sidoo kale looga baahan yahay inay bixiso:

- soo koobidda faallooyinka la helay intii lagu jiray kulanka labaad ee dadweynaha ee falanqaynta saameynaha is-biirsaday iyo muddada faallooyinka dadweynaha, iyo jawaabaha ay xaruntu ka bixisay
- macluumaad ku saabsan saameynaha taban ee waaweyn ee ay MPCA aqoonsatay
- sababaha looga baahan yahay heshiis faa'iido bulsho
- macluumaadka ay tahay inay ku daraan heshiiska faa'iidada bulshada
- tusaalooyin faa'iidooyin lagu dari karo heshiiska faa'iidada bulshada

Kulankan ugu horreeya ee dadweynaha ee heshiiska faa'iidada bulshada wuxuu fursad u yahay dadka deggan aagga caddaaladda deegaanka ee ay saameyntu gaartay, iyo dadka kale ee danaynaya, inay bixiyaan fikradahooda bilowga ah ee ku saabsan heshiiska faa'iidada bulshada iyo faa'iidooyinka suurtagalka ah ee lagu dari karo.

**Xaggee laga heli karaa xogtan gudaha qoraalka xeerka la soo jeediyay iyo SONAR?**

Qaybta 7007.6080 Ka Qaybgalka Dadweynaha

## Qabyo-qoraalka heshiiska faa'iidada bulshada (waxaa dhammaystiray Xarunta)

Xarunta waxay diyaarinaysaa qabyo-qoraal heshiis faa'iido bulsho oo ka kooban macluumaadka looga baahan yahay xeerka. Xaruntu waa inay tixgelisaa faallooyinka la helay intii lagu jiray kulanka ugu horreeya ee dadweynaha ee heshiiska faa'iidada bulshada iyo muddada faallooyinka dadweynaha marka ay diyaarinayso qabyo-qoraalkan.MPCA waxay soo jeedisay macluumaadka khasabka ah ee ay tahay in lagu daro, oo ay ka mid yihiin::

- sharaxaad ku saabsan tallaabada oggolaanshaha ee la codsaday
- saameynaha suurtagalka ah iyo kuwa la filayo ee ka dhalan kara tallaabada oggolaanshaha ee la codsaday
- faa'iidooyinka bulshada, iyo saameynaha togan iyo kuwa taban ee faa'iidooyinkaas
- jadwallada la filayo ee hirgelinta iyo muddada ay faa'iidooyinku sii jiri doonaan
- shuruudaha warbixin-bixinta iyo ogeysiinta
- macluumaad ama shuruudo kale, sida ay go'aamiso MPCA

**Qabyo-qoraalka heshiiska faa'iidada bulshada** waa nuqulka bilowga ah ee heshiiska faa'iidada bulshada oo ay xaruntu diyaarsato una soo bandhigto dadweynaha si ay u eegaan. Qabyo-qoraalka heshiiska faa'iidada bulshada waxaa la heli karaa ka hor kulanka labaad ee dadweynaha ee heshiiska faa'iidada bulshada iyo muddada faallooyinka dadweynaha.

MPCA ma soo jeedin faa'iidooyin gaar ah oo ay tahay inay tixgeliyaan xarunta ama dadka deggan aagga caddaaladda deegaanka ee ay saameyntu gaartay. Sharcigu wuxuu uga baahan yahay xarunta inay tixgeliso faa'iidooyinka bulshada ee aan ahayn ama ka badan faa'iidooyinka dhaqaale, isla markaana ay mudnaanta siiso faa'iidooyinka si toos ah u saameeya dadka deggan aagga caddaaladda deegaanka ee ay saameyntu gaartay.

Xarunta waa inay u gudbisaa MPCA qabyo-qoraalka heshiiska faa'iidada bulshada ugu yaraan 45 maalmood ka hor kulanka labaad ee dadweynaha ee heshiiska faa'iidada bulshada. MPCA waa inay ogeysiisaa qof kasta oo codsaday in lagu wargeliyo marka MPCA hesho qabyo-qoraalka heshiiska faa'iidada bulshada, isla markaana ay ku wadaagto qabyo-qoraalka heshiiska faa'iidada bulshada bogga internetka ee hay'adda..

**Xaggee laga heli karaa xogtan gudaha qoraalka xeerka la soo jeediyay iyo SONAR?**

Qaybta 7007.6110 Heshiisyada Faa'iidada Bulshada (Community Benefit Agreements)

## Kulanka labaad ee dadweynaha ee heshiiska faa'iidada bulshada iyo muddada faallooyinka dadweynaha.

Qoraalka sharciga wuxuu uga baahan yahay xarunta inay qabato ugu yaraan hal kulan dadweyne gudaha aagga caddaaladda deegaanka ee ay saameyntu gaartay haddii looga baahan yahay inay gasho heshiis faa'iido bulsho. MPCA waxay xeerka ku soo jeedisay in xarunta qabato hal kulan ka hor diyaarinta heshiiska faa'iidada bulshada, halka kulan kale la qabanayo kadib.

MPCA waxay soo jeedisay goobaha iyo waqtiyada kulamada la qaban karo, macluumaadkana ay tahay in la wadaago, iyo goorta iyo sida macluumaadka looguo baahan yahay loo wadaagayo. Dulmar guud oo ku saabsan shuruudaha la soo jeediyay ee dhammaan ogeysiisyada dadweynaha, kulamada dadweynaha, iyo muddooyinka faallooyinka dadweynaha inta lagu jiro habka saameynaha is-biirsaday waxaa laga heli karaa Shuruudaha Ka Qaybgalka Dadweynaha (La Soo Jeediyay).

Xarunta waxaa sidoo kale looga baahan yahay inay bixiso:

- soo koobidda faallooyinka la helay intii lagu jiray kulanka ugu horreeya ee dadweynaha ee heshiiska faa'iidada bulshada iyo muddada faallooyinka dadweynaha, iyo jawaabaha ay bixisay xarunta
- soo koobid qabyo-qoraalka heshiiska faa'iidada bulshada
- sharaxaad ku saabsan sida faallooyinku u saameeyeen qabyo-qoraalka heshiiska faa'iidada bulshada

Kulankan labaad ee dadweynaha ee heshiiska faa'iidada bulshada iyo muddada faallooyinka dadweynaha wuxuu fursad u siinayaa dadka deggan aagga caddaaladda deegaanka ee ay saameyntu gaartay, iyo dhinacyada kale ee danaynaya, inay ka dhiibtaan aragtidooda qabyo-qoraalka heshiiska faa'iidada bulshada. Xarunta waa inay tixgelisaa faallooyinkan marka ay dib u eegis iyo wax ka beddel ku samaynayso qabyo-qoraalka heshiiska. Faa'iidooyinka lagu dari doono heshiiska faa'iidada bulshada waa in lagaga wada hadlo kulankan dhexdiisa xarunta iyo dadka deggan aagga caddaaladda deegaanka ee ay saameyntu gaartay.

**Xaggee laga heli karaa xogtan gudaha qoraalka xeerka la soo jeediyay iyo SONAR?**

Qaybta 7007.6080 Ka Qaybgalka Dadweynaha

Dukumentigan wuxuu bixinayaa dulmar guud oo ku saabsan Xeerka Saameynta Is-biirsaday, sida ay MPCA u soo jeedisay May 18, 2026. Nuqullo dhammaystiran oo qoraalka xeerka la soo jeediyay iyo Bayaanka Baahida iyo Macquulnimada (SONAR) waxaa laga heli karaa [www.pca.state.mn.us/ci](www.pca.state.mn.us/ci). Xeerku ma noqon doono mid kama dambeys ah ilaa laga soo gabagabeeyo habraaca maamul-dejinta xeerarka.

MINNESOTA POLLUTION CONTROL AGENCY

## Heshiiska faa'iidada bulshada ee la soo jeediyay (waxaa dhammaystiray xarunta)

Kadib kulanka labaad ee dadweynaha iyo muddada faallooyinka dadweynaha, xarunta waxay dib u eegis iyo wax ka beddel ku samaynaysaa qabyo-qoraalka heshiiska faa'iidada bulshada iyadoo adeegsanaysa faallooyinka la bixiyay intii lagu jiray kulamada dadweynaha, muddooyinka faallooyinka dadweynaha, iyo hawlaha kale ee wacyigelinta iyo ka-qaybgalka ee ay fulisay xarunta. Marxaladdan, qabyo-qoraalka heshiiska faa'iidada bulshada ee dib loo eegay wuxuu noqdaa heshiiska faa'iidada bulshada ee la soo jeediyay, kaas oo loo gudbin doono MPCA.

Xarunta waa inay u gudbisaa MPCA heshiiska faa'iidada bulshada ee la soo jeediyay, iyo diiwaannada hawlaha wacyigelinta iyo ka-qaybgalka ee ay fulisay xarunta, 45 maalmood gudahood laga bilaabo dhammaadka muddada faallooyinka dadweynaha ee kulanka labaad ee dadweynaha ee heshiiska faa'iidada bulshada. Xarunta waa inay sidoo kale bixisaa sharaxaad iyo sababayn ku saabsan isbeddel kasta oo lagu sameeyay qabyo-qoraalka heshiiska faa'iidada bulshada intii lagu jiray diyaarinta heshiiska faa'iidada bulshada ee la soo jeediyay.

**Heshiiska faa'iidada bulshada ee la soo jeediyay** waa nooca heshiiska faa'iidada bulshada ee ay xarunta soo jeedinayso inay la gasho MPCA. Xarunta waxay u gudbisaa MPCA heshiiska faa'iidada bulshada ee la soo jeediyay si loo tixgeliyo kadib kulanka labaad ee dadweynaha ee heshiiska faa'iidada bulshada iyo muddada faallooyinka dadweynaha.

MPCA waa inay la wadaagtaa bogga internetka ee hay'adda heshiiska faa'iidada bulshada ee la soo jeediyay iyo dukumenti ka kooban sharaxaadda iyo sababaynta isbeddellada ay xarunta ku samaysay qabyo-qoraalka heshiiska faa'iidada bulshada. MPCA waa inay ogeysiisaa qof kasta oo codsaday in lagu wargeliyo marka MPCA hesho heshiiska faa'iidada bulshada ee la soo jeediyay.

**Xaggee laga heli karaa xogtan gudaha qoraalka xeerka la soo jeediyay iyo SONAR?**

Qaybta 7007.6110 Heshiisyada Faa'iidada Bulshada (Community Benefit Agreements)

## Go'aaminta hordhaca ah ee heshiiska faa'iidada bulshada (waxaa dhammaystiray MPCA)

MPCA waxay samaysaa go'aamin hordhac ah oo ku saabsan inay la geli doonto iyo in kale heshiiska faa'iidada bulshada xarunta.

MPCA waa inay samayso go'aamintan hordhaca ah ka hor ogeysiiska dadweynaha ee qabyo-qoraalka oggolaanshaha. Haddii MPCA samayso go'aamin hordhac ah oo ah inay la gasho xarunta heshiis faa'iido bulsho, MPCA ma geli karto heshiiskaas ilaa laga dhammaystiro ogeysiiska dadweynaha iyo muddada faallooyinka dadweynaha ee qabyo-qoraalka oggolaanshaha.

MPCA waa inay diyaarisaa oo ay ku wadaagtaa bogga internetka ee hay'adda dukumenti qoraal ah oo wata go'aaminteeda hordhaca ah ee ku saabsan inay la geli doonto iyo in kale heshiiska faa'iidada bulshada xarunta, iyo sharaxaad ku saabsan sida go'aankaas loo gaaray, muddo 30 maalmood gudahood ah kadib marka ay samayso go'aaminta hordhaca ah.

### Sidee ayay MPCA u samayn doontaa go'aamintan?

Haddii dhammaan qodobadan soo socda ay run yihiin, MPCA waa inay la gashaa xarunta heshiis faa'iido bulsho:

1. Heshiiska faa'iidada bulshada ee la soo jeediyay waxaa loo diyaariyay si waafaqsan xeerka.
2. Waxa ku jira heshiiska faa'iidada bulshada ee la soo jeediyay waxay waafaqsan yihiin shuruudaha ku jira xeerka.
3. Jawaabaha ay bixisay xarunta waxay wax ka qabtaan arrimaha la soo qaaday intii lagu jiray kulamada dadweynaha iyo muddooyinka faallooyinka dadweynaha.
4. Heshiiska faa'iidada bulshada ee la soo jeediyay wuxuu wax ka qabtaa arrimaha la soo qaaday intii lagu jiray kulamada dadweynaha iyo muddooyinka faallooyinka dadweynaha.
5. Heshiiska faa'iidada bulshada ee la soo jeediyay wuxuu mudnaanta siinayaa faa'iidooyinka si toos ah u saameeya dadka deggan aagga caddaaladda deegaanka ee ay saameyntu gaartay.

Haddii heshiiska faa'iidada bulshada ee la soo jeediyay uusan buuxin shuruudahan, xarunta waa inay:

- bixisaa macluumaad dheeraad ah si ay u muujiso in shuruudaha la buuxiyay, ama
- dib u eegis iyo wax ka beddel ku samaysaa heshiiska faa'iidada bulshada ee la soo jeediyay si uu u buuxiyo shuruudahan

### Waa maxay macluumaadka ay MPCA tixgelin doonto marka ay samaynayso go'aamintan hordhaca ah?

MPCA waxay tixgelin doontaa waxyaabaha soo socda marka ay samaynayso go'aaminta hordhaca ah ee ku saabsan inay la geli doonto iyo in kale heshiiska faa'iidada bulshada xarunta:

- tallaabada oggolaanshaha ee la codsaday
- falanqaynta saameynaha is-biirsaday
- saameynta ama saameynaha taban ee waaweyn ee ka dhalan kara tallaabada oggolaanshaha ee la codsaday
- heshiiska faa'iidada bulshada ee la soo jeediyay
- faallooyinka qoran iyo kuwa afka ah ee la helay intii lagu jiray habka saameynaha is-biirsaday
- jawaabaha ay bixisay xarunta ee ku saabsan faallooyinka la helay intii lagu jiray habka saameynaha is-biirsaday

### Xaggee laga heli karaa xogtan gudaha qoraalka xeerka la soo jeediyay iyo SONAR?

Qaybta 7007.6110 Heshiisyada Faa'iidada Bulshada (Community Benefit Agreements)

Dukumentigan wuxuu bixinayaa dulmar guud oo ku saabsan Xeerka Saameynta Is-biirsaday, sida ay MPCA u soo jeedisay May 18, 2026. Nuqullo dhammaystiran oo qoraalka xeerka la soo jeediyay iyo Bayaanka Baahida iyo Macquulnimada (SONAR) waxaa laga heli karaa www.pca.state.mn.us/ci. Xeerku ma noqon doono mid kama dambeys ah ilaa laga soo gabagabeeyo habraaca maamul-dejinta xeerarka.

MINNESOTA POLLUTION CONTROL AGENCY

## Habka oggolaanshaha hawada iyo go'aanka oggolaanshaha (waxaa dhammaystiray)

MPCA waxay ka shaqaysaa oggolaanshayaasha hawada iyadoo raacaysa Qaybta 7007 ee Xeerarka Minnesota.

Xeerka saameynaha is-biirsaday wuxuu qeexayaa shuruudo dheeraad ah oo ay tahay in la buuxiyo. Shuruudahan dheeraadka ah waxaa lagu go'aamiyaa marxaladda uu gaaro xarunta inta lagu jiro habka saameynaha is-biirsaday.

Haddii MPCA go'aamiso in xarunta **aan looga baahnayn inay samayso falanqayn saameynaha is-biirsaday:**

- ma jiraan shuruudo dheeraad ah oo ka imanaya xeerka saameynaha is-biirsaday oo ay tahay in la tixgeliyo.

Haddii xarunta samayso falanqayn saameynaha is-biirsaday, isla markaana tallaabada **oggolaanshaha ee la codsaday aysan keeni doonin saameyn taban oo waaweyn:**

- oggolaanshaha lama bixin karo ilaa ay ka soo wareegaan 30 maalmood kulankii ugu dambeeyay ee dadweynaha ee ay qabatay xarunta, iyo
- MPCA waa inay tixgelisaa falanqaynta saameynaha is-biirsaday iyo faallooyinka qoran iyo kuwa afka ah ee la gudbiyay intii lagu jiray habka saameynaha is-biirsaday marka ay samaynayso go'aanka ah in oggolaanshaha la bixiyo ama la diido.

Haddii xarunta samayso falanqayn saameynaha is-biirsaday, isla markaana **tallaabada oggolaanshaha ee la codsaday ay keeni doonto saameyn taban oo waaweyn:**

- oggolaanshaha lama bixin karo ilaa ay ka soo wareegaan 30 maalmood kulankii ugu dambeeyay ee dadweynaha ee ay qabatay xarunta
- oggolaanshaha waa in la diidaa haddii xarunta aysan la gelin MPCA heshiis faa'iido bulsho
- MPCA waxay bixin kartaa oggolaansho ay ku jiraan shuruudo lagu xaddidayo dhismaha ama hawlgalka xarunta si loo ilaaliyo caafimaadka dadka iyo deegaanka, haddii xarunta iyo MPCA ay galaan heshiis faa'iido bulsho
- MPCA waa inay tixgelisaa falanqaynta saameynaha is-biirsaday iyo faallooyinka qoran iyo kuwa afka ah ee la gudbiyay intii lagu jiray habka saameynaha is-biirsaday marka ay samaynayso go'aanka ah in oggolaanshaha la bixiyo ama la diido

Haddii xarunta looga baahan yahay inay samayso falanqayn saameynaha is-biirsaday, xarunta ma bilaabi karto dhismaha ama hawlgalka wax-ka-beddel lagu sameynayo xarunta, MPCA-na ma bixin karto ama ma diidi karto oggolaanshaha ilaa MPCA ay go'aamiso inaysan jirin saameyn taban oo weyn, ama heshiiska faa'iidada bulshada ay saxiixaan labada dhinac.

Go'aanka ah in la bixiyo ama la diido oggolaanshaha hawada waa natiijada kama dambaysta ah ee habka saameynaha is-biirsaday, iyadoon loo eegin inta uu gaarsiisan yahay horumarka ay xarunta ka samaysay habkaas.

### Xaggee laga heli karaa xogtan gudaha qoraalka xeerka la soo jeediyay iyo SONAR?

Qaybta 7007.6120 Go'aannada Oggolaanshaha

Dukumentigan wuxuu bixinayaa dulmar guud oo ku saabsan Xeerka Saameynta Is-biirsaday, sida ay MPCA u soo jeedisay May 18, 2026. Nuqullo dhammaystiran oo qoraalka xeerka la soo jeediyay iyo Bayaanka Baahida iyo Macquulnimada (SONAR) waxaa laga heli karaa www.pca.state.mn.us/ci. Xeerku ma noqon doono mid kama dambeys ah ilaa laga soo gabagabeeyo habraaca maamul-dejinta xeerarka.

MINNESOTA POLLUTION CONTROL AGENCY

## Wax-ka-beddelka heshiiska faa’iidada bulshada

MPCA waxay xeerka ku soo jeedisay hab lagu sameeyo wax-ka-beddelka heshiiska faa’iidada bulshada. Xarun la gashay MPCA heshiis faa’iido bulsho waxay gudbin kartaa codsi lagu dalbanayo kordhin waqti ama isbeddello kale oo lagu sameeyo heshiiska faa’iidada bulshada.

### Codsashada kordhin waqti ee heshiiska faa’iidada bulshada

Si loo codsado kordhin waqti oo lagu sameeyo jadwalka ku jira heshiiska faa’iidada bulshada, xarunta waa inay u gudbisaa MPCA codsi ugu yaraan 30 maalmood ka hor. Codsigu waa inuu ka koobnaadaa sharaxaad ku saabsan kordhinta waqtiga iyo sababta loogu baahan yahay. Kordhinta waqtigu ma dhaqan galayso ilaa MPCA ay go’aamiso inay ansixinayso iyo in kale codsigaas, isla markaana ay bixiso oggolaansho qoraal ah.

MPCA waa inay go’aamisaa in sabab macquul ah (good cause) ay jirto iyo in kale iyadoo ku salaynaysa miisaanka caddeymaha ay xarunta soo gudbisay si ay u muujiso jiritaanka sababtaas.

### Codsashada wax-ka-beddel kasta oo kale oo lagu sameeyo heshiiska faa’iidada bulshada

Si loo codsado isbeddel lagu sameeyo heshiiska faa’iidada bulshada, marka laga reebo kordhin waqti, xarunta waa inay u gudbisaa MPCA codsi ay ku jiraan:

- sharaxaad ku saabsan isbeddellada la codsanayo
- sababaha loo codsanayo isbeddelladaas
- sharaxaad ku saabsan sida ay xarunta u siin doonto ogeysiis dadweynaha
- nuqul ka mid ah ogeysiiska dadweynaha

MPCA waxay dib u eegtaa codsiga si ay u xaqiijiso in macluumaadka loo baahan yahay lagu daray ka hor inta aysan xarunta bixin ogeysiiska muddada faallooyinka dadweynaha. Haddii codsiga aan la ansixin karin, MPCA waxay u sheegi doontaa xarunta sababta codsiga loo ansixin waayay iyo sida iyo waqtiga lagu saxayo arrimaha jira.

Xarunta waa inay bixisaa ogeysiis dadweyne ugu yaraan 15 maalmood ka hor muddada faallooyinka dadweynaha ee loo baahan yahay, iyadoo ogeysiinaysa dhammaan dadka iska diiwaangeliyay inay helaan ogeysiisyada dadweynaha inta lagu jiro habka saameynaha is-biirsaday iyo qof kasta oo gudbiyay faallo intii lagu jiray habka saameynaha is-biirsaday. Faallooyinka qoran iyo kuwa afka ah waa in la aqbalaa muddo 45 maalmood ah, xaruntuna waa inay MPCA u gudbisaa jawaab qoraal ah oo ku saabsan dhammaan faallooyinka 30 maalmood gudahood laga bilaabo dhammaadka muddada faallooyinka dadweynaha.

MPCA waa inay bogga internetka ee hay’adda ku daabacdaa heshiiska faa’iidada bulshada, iyadoo si faahfaahsan u muujinaysa isbeddellada la codsaday, iyo sidoo kale jawaabaha laga bixiyay faallooyinka. MPCA waa inay ogeysiisaa qof kasta oo codsaday in lagu wargeliyo marka MPCA hesho heshiis faa’iido bulsho oo wax laga beddelay.

Xarunta ma hirgelin karto wax isbeddel ah oo lagu codsaday heshiiska faa’iidada bulshada ilaa MPCA ay ansixiso isbeddelladaas oo ay la gasho xarunta heshiis faa’iido bulsho oo wax laga beddelay.

Dukumentigan wuxuu bixinayaa dulmar guud oo ku saabsan Xeerka Saameynta Is-biirsaday, sida ay MPCA u soo jeedisay May 18, 2026. Nuqullo dhammaystiran oo qoraalka xeerka la soo jeediyay iyo Bayaanka Baahida iyo Macquulnimada (SONAR) waxaa laga heli karaa www.pca.state.mn.us/ci. Xeerku ma noqon doono mid kama dambeys ah ilaa laga soo gabagabeeyo habraaca maamul-dejinta xeerarka.

## Sidee ayay MPCA u samayn doontaa go'aamintan?

Haddii dhammaan qodobadan soo socda ay run yihiin, MPCA waa inay ansixisaa isbeddellada la codsaday isla markaana ay la gashaa xarunta heshiis faa'iido bulsho oo wax laga beddelay:

1. Codsiga iyo ogeysiiska lagu dalbanayo wax-ka-beddelka heshiiska faa'iidada bulshada waxaa loo diyaariyay si waafaqsan xeerka.
2. Jawaabaha ay bixisay xarunta waxay wax ka qabtaan arrimaha la soo qaaday intii lagu jiray muddada faallooyinka dadweynaha.
3. Heshiiska faa'iidada bulshada ee wax laga beddelay wuxuu wax ka qabtaa arrimaha la soo qaaday intii lagu jiray muddada faallooyinka dadweynaha

## Waa maxay macluumaadka ay MPCA tixgelin doonto marka ay samaynayso go'aamintan?

MPCA waxay tixgelin doontaa waxyaabaha soo socda marka ay go'aaminayso inay ansixinayso iyo in kale isbeddellada la codsaday ee heshiiska faa'iidada bulshada:

- codsiga wax-ka-beddelka heshiiska faa'iidada bulshada
- ogeysiiska loo diray dadweynaha
- faallooyinka qoran ee la helay intii lagu jiray muddada faallooyinka dadweynaha
- jawaabaha ay bixisay xarunta ee ku saabsan faallooyinka la helay intii lagu jiray muddada faallooyinka dadweynaha

### Xaggee laga heli karaa xogtan gudaha qoraalka xeerka la soo jeediyay iyo SONAR?

Qaybta 7007.6115 Wax-ka-beddelka Heshiisyada Faa'iidada Bulshada (Modifying Community Benefit Agreements)

Dukumentigan wuxuu bixinayaa dulmar guud oo ku saabsan Xeerka Saameynta Is-biirsaday, sida ay MPCA u soo jeedisay May 18, 2026. Nuqullo dhammaystiran oo qoraalka xeerka la soo jeediyay iyo Bayaanka Baahida iyo Macquulnimada (SONAR) waxaa laga heli karaa www.pca.state.mn.us/ci. Xeerku ma noqon doono mid kama dambeys ah ilaa laga soo gabagabeeyo habraaca maamul-dejinta xeerarka.

MINNESOTA POLLUTION CONTROL AGENCY

# Shuruudaha ka qaybgalka dadweynaha (la soo jeediyay)

Kani waa dukumeentigii ugu dambeeyay ee ka mid ah afar dukumeenti oo bixiya dulmar guud oo ku saabsan tallaabooyinka waaweyn ee habka xeerka saameynta isbiirsatay, sida ay soo jeedisay Hay'adda Xakamaynta Wasakhowga Minnesota (MPCA) May 18, 2026. MPCA waxay diyaarisay xeerka si loogu sameeyo ogeysiis dadweyne, mana noqon doono mid kama dambeys ah ilaa laga soo gabagabeeyo nidaamka maamulka dejinta xeerarka.

Dukumeentigan kuma jiro dhammaan qoraalka xeerka la soo jeediyay, waxaana loo bandhigay si looga caawiyo daneeyayaasha xiiseynaya inay si fiican u fahmaan xeerka ay MPCA soo jeedisay. Nuqullo dhammaystiran oo ka mid ah luqadda xeerka la soo jeediyay iyo Bayaanka Baahida iyo Macquulka (SONAR) waxaa laga heli karaa www.pca.state.mn.us/ci. Qoraalka xeerka. Qoraalka xeerka waa waxa ay MPCA soo jeedinayso in la ansixiyo, SONAR-kuna waa caddeynta sharciyeed ee hay'addu ku taageereyso.

## Shuruudaha xarunta

### Ogeysiisyada dadweynaha

Xaruntu waa inay bixisaa ogeysiis dadweyne oo ku saabsan dhammaan kulammada dadweynaha ugu yaraan 30 maalmood ka hor gudaha aagga caddaaladda deegaanka ee ay saameyntu ka jirto iyadoo la adeegsanayo:

- Calaamado muuqda
- Wargeys Af-Ingiriisi ah
- Wargeys aan Af-Ingiriisi ahayn
- Dadka iska diiwaangeliyay liiska boostada elektaroonigga ah

### Kulammada dadweynaha

Xaruntu waa inay martigelisaa dhammaan kulammada dadweynaha:

- Maalin shaqo gudaheed fiidkii
- Goob ku taalla aagga caddaaladda deegaanka ee ay saameyntu ka jirto

Xaruntu sidoo kale waa inay:

- Soo bandhigto macluumaad isla markaana bixiso warqad xaqiiqooyin oo qoran
- Qaaddo faallooyin qoraal iyo af ah
- Duubto kulanka
- Bixiso turjumaad afka iyo qoraalka ah marka la codsadothaum muaj neeg thov

### Muddooyinka faallooyinka dadweynaha

Waa in la qabtaa muddo faallooyin dadweyne:

- Kulammo kasta oo dadweyne oo loo baahan yahay
- Ugu yaraan 30 maalmood

Muddada faallooyinka dadweynaha waa inay furnaataa ugu yaraan 15 maalmood kadib kulanka dadweynaha.

### Shuruudo kale

Xaruntu waa inay:

- Ka jawaabto faallooyinka lagu helo kulanka dadweynaha iyo muddada faallooyinka
- U gudbiso MPCA duubista kulanka, faallooyinka, iyo jawaabaha faallooyinka

Xaruntu waxay sidoo kale samayn kartaa wacyigelin iyo ka qaybgelid dheeraad ah, waxayna u adeegsan kartaa ka qaybgelindaas diyaarinta falanqaynta saameynta isbiirsatay iyo heshiiska faa'iidada bulshada, haddii ay diiwaangeliso macluumaad gaar ah sida lagu tilmaamay xeerka.

MPCA waxay xeerka ku soo jeedisay macluumaadka ay tahay in lagu daro ogeysiis kasta oo dadweyne iyo macluumaadka ay tahay in xaruntu bixiso dhammaan kulammada dadweynaha.

MINNESOTA POLLUTION CONTROL AGENCY

## Shuruudaha MPCA

MPCA waa inay:

- Qalabka/macluumaadka ku gelisaa bogga internetka ee hay'adda ugu yaraan 30 maalmood ka hor kulanka dadweynaha iyo inta lagu jiro muddada dadweynaha ka faaloonayaan
- Ka qaybgashaa kulammada dadweynaha ee loo baahan yahay

## Xaggee ayaa macluumaadkan laga heli karaa luqadda xeerka la soo jeediyay iyo SONAR?

Qaybta 7007.6080 Ka Qaybgalka Dadweynaha

Dukumentigan wuxuu bixinayaa dulmar guud oo ku saabsan Xeerka Saameynta Is-biirsaday, sida ay MPCA u soo jeedisay May 18, 2026. Nuqullo dhammaystiran oo qoraalka xeerka la soo jeediyay iyo Bayaanka Baahida iyo Macquulnimada (SONAR) waxaa laga heli karaa www.pca.state.mn.us/ci. Xeerku ma noqon doono mid kama dambeys ah ilaa laga soo gabagabeeyo habraaca maamul-dejinta xeerarka.

MINNESOTA POLLUTION CONTROL AGENCY

# Habraaca falanqaynta saamaynta isbiirsatay (Fikrad la soo jeediyay)

Jaantuskan habraaca wuxuu bixinayaa dulmar guud oo ku saabsan macluumaadka laga helayo qaybaha soo socda ee dukumeentiga qoraalka xeerka la soo jeediyay:

Qaybta 7007.6050 Qiimeynta Bilowga ah
Qaybta 7007.6060 Habraaca Codsiga
Qaybta 7007.6070 Go'aaminta Baahida
Qaybta 7007.6080 Ka Qaybgalka Dadweynaha

Xarunta waxay dhammaystiraysaa qiimeynta bilowga ah: Tallaabada rukhsadda ee la codsaday ma leedahay awood ay si weyn ugu saameyn karto deegaanka ama caafimaadka dadka deggan aagga EJ?

MPCA waxay dib u eegaysaa qiimeynta bilowga ah ee xarunta

(oo ay ku jirto macluumaad kasta oo kale oo loo arko mid khuseeya).

Ka sarreeya heerarka cabbirrada ee u baahan falanqayn CI ah AMA bixinta rukhsaddu waxay si weyn u saameyn kartaa caafimaadka/deegaanka.

HAA → Falanqaynta CI ee qasab ah. → MPCA waxay ku amri doontaa xarunta inay diyaariso falanqayn CI ah.

MAYA ↓

Bulshada waxay gudbisaa codsi ay ku dalbanayso falanqayn saamayn isbiirsatay oo la xiriirta tallaabada rukhsadda ee la codsaday

MPCA waxay dib u eegaysaa caddeymaha muhiimka ah
(ee lagu bixiyey codsiga AMA lagu helay ururinta macluumaadka).

Caddeymaha muhiimka ah waxay taageerayaan baahida loo qabo falanqayn CI ah AMA bixinta rukhsaddu waxay si weyn u saameyn kartaa caafimaadka/deegaanka.

HAA → Falanqayn CI oo ikhtiyaari ah → MPCA waxay ku amri doontaa xarunta inay diyaariso falanqayn CI ah.

MAYA → MPCA waxay diyaarinaysaa oo daabacaysaa dukumeenti go'aan ah oo lagu caddeynayo in falanqayn CI ah aan loo baahnayn. → U sii gudub habraaca bixinta rukhsadda

MPCA waxay diyaarinaysaa oo daabacaysaa dukumeenti go'aan ah oo lagu go'aaminayo in falanqayn CI ah loo baahan yahay.

MPCA waxay diyaarinaysaa oo daabacaysaa dukumeenti go'aan ah oo lagu caddeynayo in falanqayn CI ah loo baahan yahay.

Xarunta waxay bixisaa ogeysiiska kulanka ugu yaraan ***30 maalmood ka hor**

Kulanka 1-aad ee dadweynaha ee ku saabsan falanqaynta CI iyo muddada faallooyinka

U gudub falanqaynta saamaynta isbiirsatay.

***Maalmaha muuhiimka** ah ee la muujiyey waxay ku salaysan yihiin: Minn. Stat. 116.065, Subd. 4(b)... codsadaha ama haystaha rukhsaddu waa inuu: (1) daabacaa ogeysiis... ugu yaraan 30 maalmood ka hor kulamada.

Dukumeentigan wuxuu bixinayaa dulmar guud oo ku saabsan Xeerka Saamaynta Isbiirsatay (Cumulative Impacts Rule), sida ay MPCA u soo jeedisay 18-ka bisha May, sannadka 2026. Nuqullo dhammaystiran oo ah qoraalka xeerka la soo jeediyay iyo Qoraalka Baahida iyo Macquulnimada (Statement of Need and Reasonableness – SONAR) waxaa laga heli karaa www.pca.state.mn.us/ci.

Xeerkan si rasmi ah looma dhammeystiri doono ilaa laga soo gabagabeeyo habraaca maamulka dejinta xeerarka.

MINNESOTA POLLUTION CONTROL AGENCY

# Habraaca falanqaynta saamaynta isbiirsatay (Fikrad la soo jeediyay)

## Xarunta waxay dhammaystiraysaa falanqaynta saamaynta isbiirsatay

Falanqayntu waa inay ku jirtaa:

- khariidadda goobta xarunta
- wasakh kasta oo ku jirta goobta
- Saamaynnada cimilada ee deegaanka gaarka ah
- Daraasad ku saabsan taraafikada xarunta
- Maareynta biyaha roobka (stormwater management)
- saamaynnada urta, boodhka, iyo dhawaaqa
- xaddidaadaha, kontaroollada, ama tallaabooyin kale oo loo isticmaalo ka hortagga ama yareynta saamaynnada
- fikradaha dadweynaha iyo tallaabooyinka laga qaaday jawaab ahaan
- saamaynta dhaqan-dhaqaale ee xarunta iyo tallaabada rukhsadda ee la soo jeediyay
- falanqaynta qaabeynta tayada hawada
- falanqaynta khatarta qiiqa hawada (AERA)
- macluumaad kale oo khuseeya

Falanqaynta saamaynta isbiirsatay ma muujinaysaa in tallaabada rukhsadda ee la codsaday ay si weyn oo waxyeello leh u saameyn doonto deegaanka ama caafimaadka dadka deggan aagga caddaaladda deegaanka (environmental justice area)?

Jaantuskan habraaca wuxuu bixinayaa dulmar guud oo ku saabsan macluumaadka laga helayo qaybaha soo socda ee dukumeentiga qoraalka xeerka la soo jeediyay:

Qaybta 7007.6080 Ka Qaybgalka Dadweynaha
Qaybta 7007.6090 Falanqaynta Saameynaha Is-biirsaday
Qaybta 7007.6100 Saameynta Taban ee Weyn (Substantial Adverse Impact)

Dukumeentigan wuxuu bixinayaa dulmar guud oo ku saabsan Xeerka Saamaynta Isbiirsatay (Cumulative Impacts Rule), sida ay MPCA u soo jeedisay 18-ka bisha May, sannadka 2026. Nuqullo dhammaystiran oo ah qoraalka xeerka la soo jeediyay iyo Qoraalka Baahida iyo Macquulnimada (Statement of Need and Reasonableness – SONAR) waxaa laga heli www.pca.state.mn.us/ci.

Xeerkan si rasmi ah looma dhammeystiri doono ilaa laga soo gabagabeeyo habraaca maamulka dejinta xeerarka.

1. Xarunta waxay bixisaa ogeysiiska kulanka ugu yaraan ***30 maalmood ka hor**
2. Kulanka 2-aad ee dadweynaha: Xarunta waxay la wadaagaysaa natiijooyinka iyo haddii ay rumeysan tahay inay jirto saamayn weyn oo waxyeello leh
3. Xarunta waxay wax ka beddeli kartaa tallaabada rukhsadda ee la codsaday iyo falanqaynta saamaynta isbiirsatay
4. MPCA waxay go'aan ka gaareysaa saamaynnada weyn ee waxyeellada leh waxayna daabacaysaa dukumeentiga go'aanka
   - **MAYA** → Ma jirto saamayn weyn oo waxyeello leh: **u sii gudub habraaca bixinta rukhsadda**
   - **HAA** → Tallaabada rukhsadda ee la codsaday waxay keeni doontaa saamayn weyn oo waxyeello leh
5. Xarunta waxaa laga doonayaa inay diyaariso heshiis faa'iido bulsho (community benefit agreement)

→ **Falanqaynta saamaynta isbiirsatay kadib**

Haddii MPCA ay go'aamiso in falanqaynta saamaynta isbiirsatay ay muujinayso saamayn weyn oo waxyeello leh, xaruntu waxay go'aamin kartaa haddii ay jiraan tallaabooyin la heli karo oo looga hortagi karo ama lagu yarayn karo saamaynnada si heerka saamaynta weyn ee waxyeellada leh looga saaro.

***Maalmaha muuhiimka** ah eee la muujiyey waxay ku salaysan yihiin: Minn. Stat. 116.065, Subd. 4(b)...codsadaha ama haystaha rukhsaddu waa inuu: (1) daabacaa ogeysiis... ugu yaraan 30 maalmood ka hor kulamada.

MINNESOTA POLLUTION CONTROL AGENCY

# Habraaca falanqaynta saamaynta isbiirsatay kadib iyo heshiiska faa'iidada bulshada (Fikrad la soo jeediyay)




Jaantuskan habraaca wuxuu bixinayaa dulmar guud oo ku saabsan macluumaadka laga helayo qaybaha soo socda ee dukumeentiga qoraalka xeerka la soo jeediyay:

Qaybta 7007.6080 Ka Qaybgalka Dadweynaha
Qaybta 7007.6110 Heshiisyada Faa'iidada Bulshada (Community Benefit Agreements)
Qaybta 7007.6120 Go'aannada Oggolaanshaha

Dukumeentigan wuxuu bixinayaa dulmar guud oo ku saabsan Xeerka Saamaynta Isbiirsatay (Cumulative Impacts Rule), sida ay MPCA u soo jeedisay 18-ka bisha May, sannadka 2026. Nuqullo dhammaystiran oo ah qoraalka xeerka la soo jeediyay iyo Qoraalka Baahida iyo Macquulnimada (Statement of Need and Reasonableness – SONAR) waxaa laga heli karaa www.pca.state.mn.us/ci.

Xeerkan si rasmi ah looma dhammeystiri doono ilaa laga soo gabagabeeyo habraaca maamulka dejinta xeerarka.

***Maalmaha muhiimka** ah ee la muujiyey waxay ku salaysan yihiin:
Minn. Stat. 116.065, Subd. 4(b)... codsadaha ama haystaha rukhsaddu waa inuu: (1) daabacaa ogeysiis... ugu yaraan 30 maalmood ka hor kulamada

MINNESOTA POLLUTION CONTROL AGENCY